
# Patent Ductus Arteriosus (PDA)
Xidid Dheeraad ah ama PDA




© 2012 The Children's Heart Clinic

Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404


© 2012 The Children's Heart Clinic

## **Xidid Dheeraad ah ama PDA**
Patent Ductus Arteriosus (PDA)

Xidid dheeraad ah waa wax caadi u ah ilmaha uurka ku jira oo waxa uu u dhexeeyaa halbowlaha sambabka bidix iyo halbowlaha weyn ee hoos u baxa balse waxa uu ku xirmaa maalmo ka dib dhalashada. Patent ductus arteriosus (Xidid Dheeraad ah ama PDA) wuu sii furnaanayaa dhalashada ka dib. Waa cilladaha wadnaha ee lagu dhasho 5 ilaa 10% ilmaha sadkooda ku dhashay uurka waxay ku badan yihiin gabdhaha marka loo eego wiilasha (3:1). PDA waxay aad ugu badan tahay dhallaanka dhicisooba, oo qiyaastii waa ilaa 80% dhicisoobidda.

**Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- PDA yar: calaamad la'aan, oo badanaa ma laha guuxid ah wadmaha.
- PDA Weyn:
    - Waxa uu keeni karaa koritaan xumo iyo quudin xumo, infakshanka neefmareenka hoose, sambab-burbur (sambabbada oo gebi ahaan ama mid ka mid ah in uu burburo), wadne-garaac degdeg ah (wadnaha oo si boobsiis ah u garaaca), iyo neefgurid degdeg ah (neefsasho boobsiis ah).
    - Waxaa lagu xirayaa garaaca xididka wadnaha iyadoo markaas neef loo qaatay garaacis awgeed.
    - Xuubka weynaada ee wadnaha agtisa (qeybta ka sarreysa wadnaha iyo xabadka qeybta hoose). Dhiigga kore garaacistiisa ayaa laga maqli karaa meel u dhow bidixda xabadka kore.
    - Guux: Heerka I-IV oo ah guuxa dhiigga kore oo joogtada ah ayaa laga maqlay agagaarka bidixda kore ama kalxanta gudaheeda bidix. Sharqan ah dhiigga hoose ayaa laga maqli karaa garaaca weyn ee PDA.
    - Xusuusnow, guux mar kasta ayaa la maqlayaa oo ma tilmaamayo heerka PDA.
    - Haddii aan la ogaan, xanuunkan, xannibaadda xididdada sambabada ayaa dhici kara.

**Cilladsheegid:**

- <u>Raajada Xabadka</u>: PDA yar ayaa caadi leh. PDA ah dhexdhexaad ilaa mid weyn waxay yeelan karaan heerar kala duwan oo ah wadne-weynaad (wadnaha oo ballaarta) iyo in ay muuqato calaamadaha xididdada sambabada, oo la mid ah carruurta leh ventricular septal defects (cilladaha duleelka darbiga qalbaca ama VSDs).
- <u>EKG:</u> Caadi.
- <u>Uultarasawnka wadnaha</u>: Cilladsheegid.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Dhallaanka dhiciska ah ee laga helo PDAs joogto ah, daawo la yiraahdo indomethacin ayaa loo isticmaali karaa. Indomethacin waa *wax aan u shaqeyneyn* ilmaha sadkooda ku dhasha.
- PDAs waxaa lagu hagaajin karaa qalliin ama in qalab lagu xiro sheybaarka tuubagelinta.
- Carruurta laga helo cilladaha wadnaha ee daran, daawada ayaa loo isticmaali karaa wakhti gaaban dhalashada ka dib si loogu *ilaaliyo* xididka dheeraadka ah ilaa heerka koowaad laga bogsado qalliinka.
- Dhakhtarka wadnaha ayaa kaala hadli doona habka iyo wakhtiga qalliinka xiritaanka ah.
- La-socosho ah wadnaha iyo muddo-dheer looma baahna PDA oo iskeed isu xireysa ama in qalliin ahaan lagu xiro marka uusan jirin xanuun kale oo ah wadnaha ama xanuuno kale.
- Marka ilmaha qalab loogu geliyo sheybaarka tuubagelinta, waxaa muhiim ah in lala socdo ilaa 6 bilood ka dib marka laga saaro isbitaalka.

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:**

- Rajada nolosha iyo koboca maskaxeed marka uusan jirin xanuun kale oo ah wadnaha ama xanuuno kale.


© 2012 The Children’s Heart Clinic